IIB MAGALO

# FAAFIN RASMI AH

الجمهورية الصومالية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadk a16aad Muqdisho 28ka Agoosto 1988 L. 2 R 8

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiinayaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

Sannadka 16aad Muqdisho 1da Jannaayo 1988

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER-SHARCI L. 4 ee 1 Agoosto 1988, Wax ka beddelidda Sharci lam. 5 ee 5.11.66, Canshuurta Toosan. Bog; 620

XEER-SHARCI L. 5 1 Agoosto 1988, Canshuurta dhoofidda (tax departure). » 622

XEER-SHARCI L. 6 ee 1 Agoosto 1988, Bankiyada gaarka ah ee Dalka JDS. » 624

XEER WASAARADDA K. IYO GAADIIDKA BADDA L. 17 ee 28.6.88, Dhismo iyo dayactir Jid. » 626

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 18 ee 27 Luulyo 1988, Aqoonsi Urur Samafal Gargaare Carruurta Soomaaliyeed. » 627

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

[illegible]DA G. MUDUG, 21.7.88, Lumid 6 Jeeg War. ku qoran Xuseen Aadan Faarax L. 409 » 628

MAXKAMADDA G. BANAADIR 9.8.88, Lumid Jeeg War. L. 1046318 ku qoran Maxamuud Saleemaan Maxamed L. 410 » 629

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.8.88, Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Shamso Ibraahim Xaaji L. 411 » 630

MAXKAMADDA G. SANAAG 16.4.88, Lumid Buug Kayd L. 149/7 ku qoran Ruqiya Cismaan Jibriil L. 412 » 631

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.8.88, Lumid Buug Kayd L. 7101 ku qoran Xasan Xersi Faarax L. 413 » 632

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.8.88, Lumid 11 Jeeg War. ku qoran Maxamed Mire Cosoble L. 414 » 633

MAXKAMADDA G. BANAADIR 14.7.88, Lumid Jeeg War. L. 1147486 ku qoran Cusmaan Maxamed Nuur L. 415 » 634

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.8.88, Lumid 9 Jeeg War. ku qoran Muuse Warsame Xasan L. 416 » 635

MAXKAMADDA G. BANAADIR 17.8.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Xaaji Daa'uud Warsame Nageeye L. 417 » 636

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.8.88, Lumid 7 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cabdi Xasan L. 418 » 637

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0659588 ku qoran Maxamed Nuur Cabdi L. 419 » 638

MAXKAMADDA G. BANAADIR20.8.88, Lumid 7 Jeeg War. ku qoran Maxamed Aadan Jaamac L. 420 » 639

MAXKAMADDA G. BANAADIR 21.8.88, Lumid 16 Jeeg War. ku qoran Xaamud Maxamed Xuseen L. 421 » 640

MAXKAMADDA G. BANAADIR 23.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0116133 ku qoran Buulle Cabdi Xuseen L. 422 » 641

MAXKAMADDA G. BANAADIR 13.8.88, Lumid 15 Jeeg War. ku qoran Maxamed Axmed Cab-laahi L. 423 » 642

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.8.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Daahir Santuur Ax-med L. 424 » 643

## SAXID — QALAD

FAAFINTA RASMIGA AH EE LAM. 1 r 2 ee 20 Feb. 1988, Bog; 111 Xeerka Lam. yahay 6 ee 12 Jan. 1988, oo uu ku qoran yahay Nootaayo Dr. Axmed Maxamuud Xersi, oo si qalad ah ugu soo baxay.

Waa in loo akhriyaa sidatan Nootaayo Axmed Maxa-muud Xersi.

## QAYBTA LABAAD
## XEER

**Xeer Sharci lambar 4 ee 1 Agoosto 1988, Wax ka beddelidda Sharci lambar 5 ee 5.11.1966: Canshuurta Toosan.**

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka J.D.S;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 5 ee 5.11.1966 oo ku saabsan canshuurta toosan;

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo in la nidaamiyo uruurinta canshuurta macaashka beeraha;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer-sharciga soo socda:

### Qod. 1aad
### Cidda ay canshuurtu ku waajibtay

Laga billaabo dhaqan galka Xeer-sharcigan, canshuurta macaash macaashka ee laga helo qudaarta ay Somalfruit u dhoofiso dibedda ama ay ku iibiso Dalka gudihiisa waxaa bixineysa Somalfruit, waxayna ka reebeysaa beeraleyda mar walba oo ay siineyso qiimaha qudaarta, iyadoo loo raacayo nidaamka uu jideynayo Qod. 31aad ee Sharciga canshuuraha toosan (Sharci lambar 5 ee 5.11.1966).

### Qod. 2aad
### Boqolleyda canshuurta

Boqolleyda canshuurta ku xusan Qod. 1aad waxay no-[illegible]ysaa 7% ee dakhliga guud ee beeraley kastaa uu xaq u yeesho.

### Qod. 3aad
### Muddada canshuur bixinta

Canshuurta waxaa la bixinayaa bil kasta, ayadoo Xafiiska canshuuraha toosan ee Xamar lagu soo shubayo ugu dambenytii 10ka beri ee ku x'gta bisha canshuurtu bislaatay

Qod. 4aad

Uruurinta iyo ciqaabaha

Nidaamka uruurinta iyo ciqaabaha ee canshuurtan waxaa loo raacayaa Sharciga Canshuuraha Toosan (Sharci Lambar 5 ee 5.11.1966).

Qod. 5aad

Laalid qodobbo

Qodobbada kala ah 18, 19, 20, 21, 22 iyo 38 ee Sharciga Canshuuraha Toosan laguma dhaqi karo Canshuurtan.

Qod. 6aad

Dhaqangal

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah, iyadoo loo gudbin doono Golhaa Shacbiga ¹cogu rogo sharci.

Muqdisho, 1da Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
( Maxamed Siyaad Barre )

Xeer-sharci lambar 5, taariikh 1da Agoosto 1988: Canshuurta dhoofidda (tax departure).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 2 ee 29.12.1961: Maamulka Hantida iyo xisaabaadka Dalwadda;

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo in la mideeyo canshuurta laga qaado rakaabka duulimaadka caalamiga ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Abuurid canshuur

Waxaa la abuuray canshuurta duulimaadyada caalamiga ah oo ku waajibeysa qof kasta oo ka dhoofaya garoonnada dayuuradaha ee Dalka.

Qod. 2aad

Qiimaha canshuurta iyo qofka ay ku waajibeyso

Qiimaha canshuurta iyo qofka ay ku waajibeyso waa kan soo socota:

1. Qof kasta oo ajnabi ah waxaa laga qaadayaa 20 doolar dhoofitaan kasta.

2. Qof kasta oo Muwaadin ah ama ajnabi deggane ah waxaa laga qaadayaa Sh.So. 1.000 (kun) dhoofitaan kasta.

Qod. 3aad

Uruurinta canshuurta

Maamulka canshuurtan waxaa u xilsaaran Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta, iyadoo la raacayo nidaamka guud ee uruurinta dakhliga Dawladda Dhexe.

Qod. 4aad

Canshuur dhaaf

Waxaa canshuurta ka deysan:

1. Rakaabka taransitada ah.

2. Madaxda Qaranka iyo Saraakiisha Dawladda oo shaqo Qaran dibedda u aadaya.

3. Diplomaasiyiinta, Wakiilada iyo Saraakiisha Hay'adaha Caalamiga ah ee leh mudnaan dipolomaasi.

Qod. 5aad

Xeer nidaamiye

Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagtu wuxuu soo saari kara Xeer-nidaamiye la xiriira fulinta Sharcigan.

Qod. 6aad

Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey sharci iyo xeer kasta oo rakaabka ururmaadyada caalamiga ah saarayey khidmad ama canshuur ka baxsan midda Sharcigan jideynayo.

Qod. 7aad

Dhaqangal

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah, iyadoo loo gudbin doono Golhaa Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 3da Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
( Maxamed Siyaad Barre )

Xeer-sharci lambar 6, taariikh 1da Agoosto 1988: Bankiyada gaarka ah ee Dalka JDS.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 26 ee 7da Maajo 1970 (toleynta bankiyada gaar ah);

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo in Dalka laga furo bankiyo gaar ah (private) oo ka qayb qaata maalgelinta mashaariicda horumarinta ee Dalka ka socota;

MARKUU TIXGELIYEY: Soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Dalka JDS waxaa laga furi karaa bankiyo wadaag ah oo ka qayb qaata maalgelinta mashaariicda wax soo saarka iyo horumarinta dhaqaale ee Dalka.

2. Bankiyadu waxay noqonayaan kuwo gaar ah (private) waxaana dhismahooda, maamulkooda iyo dhaqdhaqaaqooda lagu saleynayaa Xeerka Madaniga.

Qod. 2aad

Maalgelinta dhismaha bankiyada laga hirgelinaayo Dalka waxaa la waafajinayaa habka iyo nidaamka Sharciga Maalgelinta Shisheeye ee JDS.

Qod. 3aad

Waxaa mudnaan gaar ah yeelanaya bankiyada ku talagalkoodu uu yahay maalgelinta mashaariicda la xiriirta beeraha, xoolaha, kalluumeysiga, macdanta, warshadaha, dalxiiska, gaadiidka badda, guryo dhiska iyo kheyraadka kale ee Dalka.

Qod. 4aad

Go'aanka furidda bankiyada ku tilmaaman Qod. 1aad waxaa leh Golaha Wasiirrada, isagoo dhegeystay soojeedin-

ta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo ra'yiga Guddoomi-yaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

Qod. 5aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo sa-xiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faa-finta Rasmiga ah, iyadoo loo gudbin doono Golhaa Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 3da Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
( Maxamed Siyaad Barre )

Xeer Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda L. 17 ee 28.6.88, Dhismo iyo dayactir Jid xeebeed.

WASIIRKA W.K.&G.B.

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Qodobada 2aad iyo 4aad ee Sharciga Kalluumeysiga Lr. yahay 23 ee 3dii Nofembar 1985;

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 14 ee soo baxay bishii Juunyo 1966 N. 18;

MARKUU ARKAY: Oggolaanshaha Hirgelinta Jid xeebeedka Kalluumeysiga ee Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU AQOONSADAY: Iney tahay iagama maarmaan in la dhiso jid xeebeed kalluumeysi ah (Fisheries road).

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

In si rasmi ahaan ah loo bilaabo dhismaha iyo Dayactirka Jid Xeebeed Kalluumeysi ah oo Carra Kaawo ah dhererkiisuna yahay 126 km (Boqol iyo Labaatan iyo Lix) oo isku xiri doona Muqdisho iyo Cadale.

Qod. 2aad

Lacagta ku baxeysa dhismaha iyo dayactiridda Jidka waxey dhan tahay 327,206,800.00/= (Saddex boqol labaatan iyo Toddoba Malyan Laba boqol iyo Lix kun Sideed boqol iyo [illegible]an Sh.So.) waxaana iska kaashaday JDS iyo Hey'adda Kaalmada Mareykanka (USAID).

Qod. 3aad

Mashruucan, waxaa ugu jira Miisaaniyadda JDS 60.000.000/= (Lixdan Milyan) waxaana laga bixinayaa kaalmada PL/480 ee Maraykanku na siiyo.

Qod. 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka L. 1 bog. 19
Muqdisho 2.7.1988
Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 28.6.1988,

WASIIRKA W.K.&G.B.
(Aadan Maxamed Cali)

Xeer Wasaaradda Arr. Gudaha L. 18 ee 27 Luulyo 1988: Aqoonsi Nrurka Samafalka Gargaarka Carruurta Soomaaliyeed.

Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Arrimaha Gudaha
ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.1984 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr 37 ee 2.6.1973;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay abuurista Ururada noocaan ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod.1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka Gargaarka Carruurta Soomaaliyeed (Chied Aid Somalia) oo ah Urur Samafal, ujeedadiisuna tahay daryeelka iyo xannaanaynta carrruurta Qaxootiga oo haatan ku sugan Xarunta Qoysaska Carruurta.

Qod. 2aad

Ururka wuxuu saldhiggiisu noqonayaa magaalada Muqidsho.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiir Ku-xigeenka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 27.7.1988

Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Arr. Gudaha
(Jaalle Cabdullaahi Maxamed Maax)

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

QAYBTA SAD/XAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. MUDUG KA DIB:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xuseen Aadan Faarax uuna ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jee-gagga Wareega oo hoos ku qoran oo uu ka qaatay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo;

MARKUU ARKAY: Warqadda lambar 112 ee 7.7.1988 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed Laanta Gaalkacyo, laguna caddeeyey in Jeegaggaas la-ga qaatay B.G.K. Laanta Gaalkacyo, ayna lumeen baafin guudna laga sameeyey;

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer-Sharci L. 2 soo-na baxay 9.9.1965kii.

WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo Jeegaggii hore oo lumay oo la sheegi doo-no, looguna bedello Jaalle Xuseen Aadan Faarax Jeegag cu-sub oo u dhigma kuwii hore oo ah:-

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1) | J.W.Lr. | 1136925 | Sh.So. | 100.000/= | Taariikh | 19.5.1988 |
| 2) | » | 1136926 | » | 100.000/= | » | 19.5.1988 |
| 3) | » | 1136927 | » | 100.000/= | » | 19.5.1988 |
| 4) | » | 1137104 | » | 100.000/= | » | 21.5.1988 |
| 5) | » | 0533713 | » | 50.000/= | » | 21.5.1988 |
| 6) | » | 1137195 | » | 100.000/= | » | 22.5.1988 |

Ka dib markii Go'aankaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah, haddii aan muddadaas laga keenin wax is hortaag ah. Waana in Jeegagga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Xuseen Aadan Faarax amase qof Wakaalad Sharci ah ka sita.

Gaalkacyo, 21.7.1988

GUDDOOMIYAHA M.G.M.
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud Saleemaan Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 1043318 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Maxamuud Saleemaan Maxamed sida ku cad waraadda lam. 7814 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1043318 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Maxamuud Saleemaan Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso in ay siiso J.le Maxamuud Saleymaan Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor k uqoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.8.1988

GUDDOOMIYAHA M.G.B.
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 410

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Shamso Ibraahim Xaaji;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 5 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 250.000 kuna qoran magaca J.le Shamso Ibraahim Xaaji sida ku cad warqadda lam. 7851 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 0580360 | 50.000 | Shamso | Ibraahim | Xaaji | 2aad |
| 0579617 | 50.000 | » | » | » | » |
| 0253819 | 50.000 | » | » | » | » |
| 0548843 | 50.000 | » | » | » | » |
| 0579618 | 50.000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 250.000 kuna qoran magaca J.le Shamso Ibraahim Xaaji.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad in ay siiso J.le Shamso Ibraahim Xaaji lacagta cadadee du tahay Sh.So. 250.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.8.1988

GUDDOOMIYAHA M.G.B.
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG

MGS/L.109/88 16.4.1988

UJEEDDO: Bedelaad Buug Kayd Lam. 149/7

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sanaag

MARKUU ARKAY: Codsiga T. 14.4.88, ee ay Maxkamad daan u soo qortay J.le Ruqiya Cismaan Jibriil, soona codsa-tay in loo baafiyo Buug Kayd ka lumay;

MARKUU ARKAY: waxa uu ku saabsan yahay codsi-gaasu;

MARKUU ARKAY: Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Ceerigaabo sida ku cad warqadda Sum. 55 ee 14.4.88, taasoo ay ku caddahay inuu lumay Buug-Kayd lam. 149/7, kuna qoreyd lacag dhan (45.670) shilin, iyo magaca Ruqiya Cismaan Jibriil, oo iska lahayd lacagta ku qoreyd Buug Kaydkaas, iyadoo laga baafiyey Buug Kaydkaas BGKS Laanta Ceerigaabo Tr. 13.1.1988;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N/2, lumid Buug Kayd.

WUXUU AMRAYAA

In la cusboonaysiiyo Buug-Kaydka Lam. 149/7 ka dib markii ay ka soo wareegto muddo dhan (30) maalmood ka dib marka go'aanka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buug-Kaydka ee la samayn doono gacanta laga saaro J.le Ruqiya Cismaan Jibriil ama qof iyada ka sita wakaalad sharci ah, iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sanaag Ceerigaabo
(Dr. Cabdiraxmaan Sh. Maxamed)

L. 412

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Xersi Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 7101 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.473.34 kuna qoran magaca J.le Xasan Xersi Faarax Jaamac sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 7101 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.473.34 kuna qoran magaca J.le Xasan Xersi Faarax Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir in ay siiso J.le Xasan Xersi Faarax Jaamac lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 20.473.34 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 375
L. 413

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Mire Cosoble;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 11 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 3.380.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Mire Cosoble sida ku cad warqadda lam. 8063 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 0186573 | 500.000 | Maxamed | Mire | Cosoble | War/ley |
| 0186574 | 500.000 | » | » | » | » |
| 0186575 | 500.000 | » | » | » | » |
| 0187590 | 500.000 | » | » | » | » |
| 0187591 | 500.000 | » | » | » | » |
| 0187592 | 380.000 | » | » | » | » |
| 1174687 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1174688 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1174689 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1174690 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1174691 | 100.000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci L. 2 ee 9.9.1960

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor k uqoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 3.380.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Mire Cosoble.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Maxamed Mire Cosoble lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 3.380.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS ,haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho,16.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cusmaan Maxamed Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1147486 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cismaan Maxamed Nuur sida ku cad warqadda Lam. 0633 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci L. 2 ee 9.9.1966

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1147486 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cismaan Maxamed Nuur.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Cismaan Maxamed Nuur lacagta caddadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 415

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Muuse Warsame Xasan;

HADDU UTIXGELIYEY: In ay lumeen 9 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha hoos ku xusan kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.003.000 kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 9007 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0191099 | 300 000 | Muuse Warsame Xasan | 2aad |
| 0191100 | 200.000 | » » » | » |
| 1191043 | 100.000 | » » » | » |
| 0223113 | 50 000 | C/raxmaan Maxamud Wehliye | B/Burde |
| 0223118 | 50 000 | » » » | » |
| 0223116 | 50.000 | » » » | » |
| 0223121 | 23.000 | » » » | » |
| 1155378 | 100.000 | Axmed Maxamuud Xasan | 1aad |
| 0191338 | 130.000 | Cabdullaahi Axmed Xaashi | 2aad |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.003.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku tilmaaman in ay siiyaan J.le Muuse Warsame Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.003.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 416

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaaji Daa'uud Warsame Nageeye;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley kuna jirto gaad ahaan lacag dhan Sh.So. 1.000.000 kuna kala qoran Jaallayaasha Faarax Shide Abtidoon iyo Xirsiyo Cabdi Cilmi sida ku cad warqadda lam. 8050 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0047173 | 500.000 | Faarax Shide Abtidoon | W/dhiigley |
| 0047329. | 500.000 | Xirsiyo Cabdi Cilmi | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran Lambarradooduna kala yihiin:- 0047173-0047329 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta War-dhiigley kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.000.000 kuna kala qoran magacyada Faarax Shide Abtidoon iyo Xirsiyo Cabdi Cilmi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley in ay siiso J.le Xaaji Daa'uud Warsame Nageeye lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L, 417

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cabdi Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 7 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha hoos ku tilmaaman kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 3.000.000 kuna qoran magaca midwalba ku hor qoran sida ku cad warqadda lam. 9006 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0188950 | 500.000 | Buule Cabdi Xuseen | 5aad |
| 0188944 | 500.000 | » » » | » |
| 0180133 | 500.000 | Maxamed Saciid Diiriye | Xarunta |
| 0191102 | 500.000 | Cali Aadan Maxamuud | 2/Xamar |
| 0162975 | 400.000 | Maxamed Caraale Diiriye | 1/Xamar |
| 0139312 | 500.000 | Maxamed Sadiiq Cabdala | B/dhabo |
| 1087026 | 100.000 | Maxamed Axmed Xersi | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 3.000.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku tilmaaman in ay siiyaan J.le Maxamed Cabdi Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 3.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Nuur Cabdi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0659588 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45.450 kuna qoran magaca J.le Maxamed Nuur Cabdi sida ku cad warqadda lam. 0001 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0659588 ee Bangiga Ganacsiga yio Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45.450 kuna qoran magaca J.le Maxamed Nuur Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso J.le Maxamed Nuur Cabdi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 45.450 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr.Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 419

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Aadan Jaamac;

HADDU UTIXGELIYEY: In ay lumeen 7 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.900.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Aadan Jaamac sida ku cad warqadda lam. 068 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 0191198 | 500.000 | Maxamed | Aadan | Maxamed | 2aad |
| 0191199 | 500.000 | » | » | » | » |
| 0191200 | 500.000 | » | » | » | » |
| 1192350 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1192351 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1192352 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1192353 | 100.000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.900.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Aadan Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Maxamed Aadan Jaamac lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.900.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreyta aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.8.1988

GUDDOOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 420

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaamud Maxamed Xuseen;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 16 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha hoos ku tilmaaman kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 2.400.000 kuna kala qoran magacyo kala duwan, sida ku cad warqadda lam. 9057 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0173594 | 500.000 | C/risaaq Sheekh Nuur | 2aad |
| 0173244 | 500.000 | C/llaahi Sheekh Xasan | » |
| 1146353 | 100.000 | Istoman Campany | » |
| 1151004 | 100.000 | C/llaahi Axmed Jaamac | Xarunta |
| 1208834 | 100.000 | Daahir Cumar Jimcaale | 3aad |
| 1208835 | 100.000 | » » » | » |
| 1208836 | 100.000 | » » » | » |
| 1208837 | 100.000 | » » » | » |
| 1208839 | 100.000 | » » » | » |
| 1208840 | 100.000 | » » » | » |
| 1208841 | 100.000 | » » » | » |
| 1208842 | 100.000 | » » » | » |
| 1208843 | 100.000 | » » » | » |
| 1208845 | 100.000 | » » » | » |
| 1208846 | 100.000 | » » » | » |
| 1208847 | 100.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

## WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 2.400.000.

## WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran in ay siiyaan J.le Xaamud Maxamed Xuseen

lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 2.400.000 oo ah bedelkii Jee-gagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aan-ka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 421

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Buule Cabdi Xuseen;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0116133 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo-maaliyeed Laanta B/Xaawo kuna jirto lacag dhan Sh. So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Buulje Cabdi Xuseen sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0116133 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Buulle Cabdi Xuseen.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo in ay siiso J.le Buulle Cabdi Xuseen lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 422

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud Axmed Cabdullaahi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 15 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa 1aad iyo 3aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 3.500.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Axmed Cabdullaahi sida ku cad warqadda lam. 7909 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa 1aad iyo 3aad;

| J.W.Lr. | Taariikh | Sh.So. | Laanta | Magaca ku qoran | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 0079007 | 27.2.88 | 500.000 | 3/Harg. | Max'ed | Axmed | C/llaahi |
| 0079006 | » | 500.000 | » | » | » | » |
| 0079004 | » | 500.000 | » | » | » | » |
| 0079005 | » | 500.000 | » | » | » | » |
| 0933766 | » | 100.000 | » | » | » | » |
| 0933768 | » | 100.000 | » | » | » | » |
| 0933770 | » | 100.000 | » | » | » | » |
| 0933771 | » | 100.000 | » | » | » | » |
| 0933772 | » | 100 000 | » | » | » | » |
| 0933773 | » | 100 000 | » | » | » | » |
| 0933312 | 4.2.88 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0582148 | » | 50.000 | » | » | » | » |
| 0582149 | » | 50 000 | » | » | » | » |
| 0086722 | 27.2.88 | 500.000 | 1/Harg. | » | » | » |
| 0086723 | » | 200.000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad iyo 3aad ee Hargeysa kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 3.500.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Axmed Cabdullaahi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran in ay siiyaan J.le Maxamuud Axmed Cabdullaahi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 3.500.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 423

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxaadey Sh. Cali Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/weyne kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 150.000 kuna qoran magaca J.le Daahir Santuur Axmed sida ku cad warqadda lam. 7525 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/weyne;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0013999 | 50.000 | Daahir Santuur Axmed | B/weyne |
| 0013897 | 50.000 | » » » | » |
| 0013898 | 50.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/weyne kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 150.000 kuna qoran magaca J.le Daahir Santuur Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/weyne in ay siiso J.le Maxaadey Sheekh Cali Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 150.000·oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 424